



## Coalition for Somali Political Parties

Ref: IXSS/0011/019

Date: 09/Nov/2019

# WAR-SAXAAFADDEED

Shir Wada tashi ah oo socday mudo 3-cisho ah kaasoo looga hadlay xog ogaal u noqoshada xaalada dalka oo ay yeesheen xisbiyada maanta kulanka yeeshay ayaa waxa looga hadlay qodobadan:-

- 1. Sidi Loo Abuuri Lahaa Gudi Ka Qeyb Qaata Taakuleynta dadka Fatahaaduhu Saameeyeen.**
- 2. Xaalada Siyaasadeed Ee Uu Dalku Marayo.**
- 3. Doorasho Dalka Ka Dhacda Waqtigeedii Iyo Qodobo Kale.**

Dood Iyo falaanqeyn ka dib ugu horeyn waxay isbaheysiga xisbiyada siyaasada u mahdceliyeen soona dhaweeyeen intii gacanta ka geysatay gurmada fatahaadaha wabiyada Jubba Iyo Shabeelle.

Sidoo kale isbaheysiga xisbiyada siyaasada waxay si dhow ula wadaagayaan xanuunka iyo dhibaataada ay fatahaadadaha wabiyadu gaarsiyeen dadka Soomaaliyeed iyagoona sheegay in wixii karaankooda ah si deg deg ah u gaarsiin doonaan.

Isbaheysiga xisbiyada siyaasada Soomaaliya waxay ka soo horjeedaan cambaareynayaana Khal Khal gelinta iyo kicinta dadka Soomaaliyeed taasoo la dhihi karo maanta in aysan aheyn mid waqtigeedii la joogo, waxeyna ku baaqayaan in la aburo xasilooni siyaasadeed.

“Waa nasiib daro in maanta Siyaasiyiinta Dalka qaarkood iyo dad magac ku leh dalka ay u sacaba tumaan colaad iyo qax hor leh kuna faanaan, in ay qeyb ka ahaayeen bur burkii iyo barakicii ka dhacay dalka taasoo ah dulmi Umadeed”.

Sidaasi awgeed isbaheysiga xisbiyada siyaasada dalka waxay soo jeedinayaa in la dhowro sareynta sharciga iyo qaanuunka dalka u yaala.

Isbaheysiga xisbiyada ayaa waxay boogadinayaan soona dhaweynayaan hormarka difaac ee ciidamada qalabka sida iyo korosiimada mushahar oo ay xukuumadu u sameysay ciidanka, iyagoona ka digay in la siyaasadeeyo arimaha ciidamada.

Xisbiyada ayaa sidoo kale Caddeeyey in ay ku faraxsanyihiin, Soona Dhaweynayaan 30-sano kadib in bangiga aduunka uu laan ka furto Soomaaliya, taasoo ay ku guuleysatey xukuumada dalka ka arrimisa xiligan.

Ugu dambeyntii isbahaysiga xisbiyada siyaasada dalka waxay hoosta ka xariiqeen in baarlamaanka dowlada federaalka Soomaaliya ay si deg deg ah u soo meel mariyaan xeerka doorashooyinka dalka ee hada gacantooda ku jira, si loo helo hanaan doorasho ee la wada ogolyahay Si dalku doorashouga dhacdo 2020-2021.

# **DHAMAAD**